Masaasadda dambe laga bilaabo lix bilood

BabySemp 2
BabySemp 2 Lemolac
BabySemp 2 SensiPro

DIYAARINTA

1. **Gudaha makroweefka: Biyaha qabow ku cabbir dhalada quudinta oo ku dar tirada saxda ah ee qaaddada budada.**
2. **Dhalada xir oo rux/isku qas ilaa budadu ay milmayso.**
3. **Dabool la'aan kululee oo si buuxda u kululee qiyaastii 40 ilbiriqsi.**
4. **Hubi in milanku uusan aad u kululayn adigoo qiyaas yar ku dhibcinaya gudaha curcurkaaga. Adigu yara cab ka hor inta aadan siin ilmaha.**
5. **Mid si cusub loo diyaariyey sii. Ha kaydin soo haraaga.**

Digsi dhexdiis: Digsi ku wada qas qiyaas sax ah ee budo iyo biyo qabow oo gaarsii kulayl lagu cuno.

SHAXANKA QIYAASTA

Waa muhiim in la isticmaalo qiyaasta sax ah ee budada ee ku toosan qiyaasta biyaha. Budada ku badan waxay keeni kartaa calool fadhi. Budada ku yar waxay keeni kartaa in ilmahaagu uusan helin tamar iyo nafaqo ku filan.

Biyo	Budo	Qiyaas qayb
60 ml	2 qaaddo	65 ml
90 ml	3 qaaddo	100 ml
120 ml	4 qaaddo	135 ml
150 ml	5 qaaddo	165 ml
180 ml	6 qaaddo	200 ml
210 ml	7 qaaddo	235 ml
240 ml	8 qaaddo	265 ml

Qiyaas qaaddo 8.6 ml = 4.7 g. Marwalba isticmaal qaaddada la bixiyey ee cabbirro toosan.

ISTICMAALKA

Marwalba xarunta daryeelka caafimaadka carruurta kala tasho cuntada ilmahaaga. BabySemp 2/BabySemp 2 Lemolac/BabySemp 2 SensiPro waa masaasado ama qasaacyo dambe oo la raaciyo oo keliya cuntada sii kaladuwan ee ilmaha.

BabySemp 2/BabySemp 2 Lemolac/BabySemp 2 SensiPro waxay ku habboon yihiin oo keliya carruurta lix bilood ka weyn mana aha in lagu beddelo caanaha naaska lixda bilood ee ugu horraysa nolosha ilmaha.

BabySemp 2 Lemolac/BabySemp 2 SensiPro waxay leeyihiin cabbir pH hoose. Waxay tani qayb ahaan burburisaa borotiinka wayna jilcisaa. Waxaa tan laga arki karaa masaasadaha BabySemp 2 Lemolac/BabySemp 2 SensiPro ee la diyaariyey, oo kuuskuus yari ay ka muuqdaan.

Si tayada ugu fiican loo helo, masaasadda dambe waa in la bixiyo islamarka cusub ee la diyaariyo waana in lagu isticmaalo hal saacad gudaheed.

Muhiim: Masaasadda BabySemp 2 SensiPro kulaylkeeda ha dhaafinin 40 digirii Celsius. Heerkulka ka sarreeya waxuu yareeyaa saamaynta baktiiriyada nool ee beeran, *Lactobacillus Reuteri* Protectis®, isla sida Semper Magdroppar.

QAYB ILAA INTEE LEEG?

Qiyaasaha ku jira shaxdu waa ku dhawaad maadaama carruur kaladuwan qaataan qiyaaso kaladuwan. Ilmahaaga ayaa inta uu qaato u nidaaminaya sida uu ugu baahdo iyo cuntada caadiga ah ee uu qaato. Markaa, shaxda waa in hagis keliya laga dhigto.

Da'da ilmaha	Tiro cunto maalintii	Biyo	Budo	Qiyaas qayb
6–8 bil	1–3	210 ml	7 qaaddo	235 ml
	1–4	180 ml	6 qaaddo	200 ml
> 8 bil	1–3	210 ml	7 qaaddo	235 ml
	1–3	180 ml	6 qaaddo	200 ml

UGU FIICAN KA HOR

Taariikhda ugu fiican ka hor ayaa ku taalla korka baakadka. Baakadka furan waa in lagu dhammeeyo hal bil gudaheed.

KAYDINTA

Ku kaydi meel engegsan oo madow oo leh heerkulka caadiga ah ee qolalka. Marwalba budada ku dhex kaydi baakadkeedii asalka ahaa. Daboolka waxaa ku jirta meel si caaqil ah loogu kaydiyo qaaddada.

SU'AALO AMA FAALLOOYIN?

Na soo wac! Semper AB • Tel. 020-62 20 00

konsumentkontakt@semper.se
www.semperbarnmat.se

Fiirso fiidiyowgayaga diyaarinta (af Iswiidhish).

Juni 2020

Cilmibaaris iyo horumarin lagala tashaday takhaatiirta carruurta

BabySemp 2/BabySemp 2 Lemolac/BabySemp 2 SensiPro waxaa ku jira isku jir dufan caano iyo saliido khudaar oo taxaddar lagu soo xulay. Carruurta yar yar ayay ku adkaan kartaa in ay iskood u dhistaan tirada ku filan ee aashiitooyinka dufan ee silsilad dheer ee omega-3 (DHA) iyo omega-6 (ARA). Markaa, waxay kuwani ku jiraan dhammaan badeecooyinka BabySemp 2, waxaana raacsan nukleotidyo iyo GOS (galacto-oligosaccharides/fibre). Macdanta birtu waxay caawisaa horumarka garaadka caadiga ah iyo fahanka carruurta. Fiitamiinka D waxuu daruuri u yahay koritaanka iyo dhiska caadiga ah ee lafaha, halka maaddada ayodine ay ka caawiso koritaanka caadiga ah. Markaa, BabySemp 2/BabySemp 2 Lemolac/ BabySemp 2 SensiPro waxaa ka buuxa macdanta birta, fiitamiinka D, iyo maaddada ayodine.